Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: XGGSH/4889 /B-11/26 :الرقم Mogadishu, Jan 05, 2026: التاريخ

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR .. 05.01.2026
TIX .. 89
SAXIIX: Cabdikaafi
BIXID / EXIT

Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.
Og: Guddiga Arrimaha Bulshada ee Golaha Shacabka BJFS
Og: Wasaaradda Caafimaadka.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka BJFS.
Og: Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka BJFS

**UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE-SHARCIYEEDKA DAAWADA**

Mudane Guddoomiye,

Waxaan halkan kugu soo gudbinaynaa Hindise-sharciyeedka Daawada, kadib markii xildhibaannada Golaha Shacabka kulankoodii 25aad ee kalfadhiga 7aad ay ku ansixiyeen si waafaqsan qodobka 69 farqadiisa (1)(a) ee Dastuurka KMG ah ee Soomaaliya, taariikhdu markay ahayd 3da Janaayo 2026, codayntuna sidaan hoose ayay u dhacday

| | |
|---|---|
| **Koramka:** | **142** |
| **Oggol:** | **141** |
| **Diiday:** | **0** |
| **Ka aamustay:** | **1** |

Hadaba, Mudane Guddoomiye, waxaan si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG halkan idinku soo gudbinaynaa Hindisihan si waajibaadkiina Dastuuriga ah aad uga gudataan.

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah

**Marwo. Sacdiya Yaasiin Xaaji Samatar**
**Ku Simaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA

Tell: +252 616641550/+252 618153111
E-mail. speaker@parliament.gov.so Website: www.parliament.gov.so

## ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DAAWADA

| |
|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay: 142<br>Oggol: 141;<br>Diiday: 0;<br>Ka Aamustay: 1; |

| Ku Simaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS | |
|---|---|
| Marwo. Sacdiya Yaasiin Xaaji Samatar | Tar: 05/01/2026 |

| Guddoomiye K/Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka BJFS | |
|---|---|
| Shaqo ku maqan<br>M.ne. Abdullahi Omar Abshir "Abshirow" | Tar: 05/01/2026 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka BJFS | |
|---|---|
| M.ne Cabdiraxmaan Maxamed Cabdulle "Jaabir" | Tar: 05/01/2026 |

Tixraax:XRW/0174/02/2024 Tariikh : 21/02/2024

**Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS** **=Muqdisho=**

**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** **=Muqdisho=**

**UJEEDDO: SOO GUDBIN HINDISE-SHARCIYEEDKA DAAWADA**

**Mudane Guddoomiye,**

Innaga oo ka anbaqaadeyna Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.07.64.02.24 ee 21/02/2024,** kuna saabsan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Daawada"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Hindise-sharciyeedka Daawada si waafaqsan Dastuurka Kumeel Gaarka ah, waxa uu soo maray dhammaan habraacyadii loo asteeyay.

Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa Hindise-sharciyeedka sare ku xusan, si aad uga gudataan waajibaadkiina dastuuriga ah.
waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Daawada ".**

**Xiriir iyo wada shaqeyn wacan.**

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 08-4-2024
TIX: 189
SAXIIX: Abdikaafi Bashir
GELID

Tixraac:XRW/252/02/2024 Tariikh: 21/02/2024

Ku: Wasaaradda Caafimaadka&Daryeelka Bulshada = Muqdisho=
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada =Muqdisho=
Og: Guddoonka Golaha Shacabka =Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

26 FEB 2024

**UJEEDDO: GO'AAN GOLE, ANSIXINTA HINDISE-SHARCIYEEDKA DAAWADA**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay Ref **MOH&HS/MOHO/0059/JAN/2024** ee ku taariikheysan 21/01/2024 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka & Daryeelka Bulshada

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.07.64.02.24 ee 21/02/2024,** kuna saabsan ansixinta **Hindise-sharciyeedka Daawada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu leeyahay Hindise-sharciyeedka Daawada .

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW07.64.02.24** ee **21/02/2024** , kuna saabsan ansixinta **Hindise-sharciyeedka Daawada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

In si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka **"Hindise-sharciyeedka Daawada"** si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

**Ref: MOH&HS/MOHO/0059/JAN/2024** **22/Jan/2024/Mogadishu**

**Ku: Xafiiska Ra'isul Wasaaraha, JFS**

**Ujeedo: Soo Gudbinta Hindise-sharciveedka Daawada**

Mudane Ra'isul -Wasaare, Salaan iyo Qadarin kadib.

Waxaa sharafweyn ii ah inaan kuu soo gudbiyo qabyo-qoraalka Sharciga Daawada oo ah sharci muhiim u ah hagaajinta, huhinta iyo sara u qaadida tayada, waxtarka iyo badqabka Daawada, Maadooyinka Baayoolojiga, Qalabka caafimaadka, dhamaystirayaasha nafaqada, Daawa- dhireedka, tubaakada iyo Agabka la isku qurxiyo oo dalkeena laga heli karo, taas oo haddii sharcigaan lahelo si weyn uga qeyb qaadan karta tayeenta Hannanka Caafimaadka Guud ee Dalka Soomaaliya.

Mudane Ra'isul Wasaare, ayadoo laga duulayo go'aankii Golaha Shacabka JFS ay dib ugu soo celiyeen sharuucadii horay loo meelmariyay oo aysan ansixinin Barlamaankii 10aad, iyo dooddii ay soo gudbisay Wasaaradda Ganacsiga ee la xariirta sharcigaan ayaan mar labaad dib u eegis ku sameeynay Sharcigaan, anagoo soo marinay dhammaan habraacyada lagama maarmaanka ah ee la xariira diyaarinta hindise-sharciyeedka taas oo ay kamid tahay ka qaybgelinta dhammaan saamileyda uu khuseeyo sharcigaan oo ay ka mid yihiin Wasaaradaha Caafimaadka ee Maamul Goboleedyada, Ururka Daawo yaqaanka Soomaaliyeed, Ururka Dhaqaatiirta Soomaaliyeed iyo Guddiga Ganacsatada Daawooleeyda Soomaaliyeed, Wasaaradda Cadaaladda Iye Dastuurka JFS, *iyo* Garyagaanka Guud ee Dowladda Soomaaliya.

Sidaa Darteed, **Mudane Raisul Wasaare**, waxaan Kaa codsanayaa in Sharciga Daawada ee ku lifaaqan warqaddaan aad mar sadaxaad horgayso **Golaha Wasiirada JFS**, si ay u meel mariyaan kadibna aad ugu gudbiso Golaha Shacabka JFS, si ay u ansxiyaan maadaama sharcigaa uu ka mid yahay sharciyada ay dowladda Soomaaliya soo balanqaaday inay soo dhamaystirayso intii lagu guda jiray ku biirista **BULSHADA BARIGA AFRIKA (EAC)** iyo sidoo kale lagu xaqiijinayo hubinta Tayada, badqabka iyo waxtarka Daawada, Maadooyinka Baayoolojiga, Qalabka caafimaadka, dhamaystirayaasha nafaqada, Daawa- dhireedka, tubaakada iyo Agabka la isku qurxiyo ee Soo gala Dalka Soomaaliya.

**Mahadsanid**
**Wada Shageyn wacan**

**Dr. Cali Xaaji Aadan Abuubakar**

**Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka & Daryeelka Bulshada, JFS**

WASAARADDA CAAFIMAADKA & DARYEELKA BULSHADA · MINISTRY OF HEALTH & HUMAN SERVICES

Baarlamanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada

البرلمان الفيدرالي الصومالي
مجلس الشعب
لجنة تنمية الخدمات الإجتماعية

Federal Parliament of Somalia
House of the People
Social Services Development Committee

**REF: GHAB/GSH/B11/0119/12/2025**

**Tr. 27/12/2025**

**Ku: Guddoonka Golaha Shacabka**

**Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka**

**Ujeeddo:** Warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka Daawada

**Mudane Guddoomiye, Xildibaanada Sharafta leh,** Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada ee Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 90aad Faqradda 1aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka BJFS halkan idinkugu soo gudbinayaa Warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka Daawada.

**Mudane Guddoomiye, Xildhibaanada Sharafta leh**, Guddigu isagoo Qaddarinaya dhammaan talooyinkii iyo soojeedintii Xildhibaannada ee Akhrinta 2aad, wuxuu waqti badan geliyey inuu dib u eegis ku sameeyo isla markaana saxo Qodobbadii ay doodda Xildhibaanada u badneyd iyadoo la waafajinaayo Dastuurka kmg iyo Shuruucda kale ee Dalka, Qodobada dib-u-habeynta lagu sameeyey waxay kala yihiin:

- **Qodobka 3aad** wuxuu Guddigu kusoo kordhiyey **Faqrad 5aad** oo ka hadleysa Wacyi gelinta Bulshada, taasoo Dooddii Akhrinta 2aad Xildhibaanada soojeediyeen.
- **Qodobka 5aad Faqradda 2aad** Wuxuu Guddigu ku sameeyey Siiqo Toosin
- **Qodobka 6aad Faqradda 5aad** Wuxuu Guddigu ku sameeyey Siiqo Toosin
- **Qodobka 6aad Faqradda 21aad** Wuxuu Guddigu ku sameeyey Siiqo Toosin
- **Qodobka 8aad Faqradda 3aad Xarafka (r)** Guddigu wuxuu ku sameeyey Wax ka beddel Siiqadii ay u qorneyd

**Mudane Guddoomiye, Xildhibaanada Sharafta leh,** idinkoo tixraac ka dhiganaya nuqulka rasmiga ah ee Hindise Sharciyeedka Daawada oo halkan ku lifaaqan waxaan si Sharaf iyo qaddarin leh idinkaga codsanaynaa inaad Ansixisaan Hindise Sharciyeedkan.

Mahadsanidiin.

**Xil. Nadra Saalax Cabdi**
**Guddoomiyaha Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada**

Tel: +252610807202 WhatsApp: +252610807202
Email: SocialAffairs.Committee@parliament.gov.so Nadra.Saleh@parliament.gov.so
Www.parliament.gov.so

**Baarlamaanka 11-aad**
**Kalfadhiga** 7 aad
**Kulankiisa** 11 aad
**Taariikhda** 9/12/2025
**Goobta** The Villas Hotel
**Guntanka** 9 Xildhiban
**Ajendaha** Diyaarinta Akhrinta 3aad Hindise Sharciyedka Daawada

| No | Magaca Xildhibaanka | Jagada | Saxiix |
|---|---|---|---|
| 1 | Xil. Nadra Saalax Cabdi Liibaan | Guddoomiye | [signature] |
| 2 | Xil. Maxamed C/raxmaan Nadiif | Xoghaye | [signature] |
| 3 | Xil. C/laahi Maxamed Jaamac Siciid | Xubin | [signature] |
| 4 | Xil. Faadumo Faarax Aadan | Xubin | [signature] |
| 5 | Xil. Xassan Budul Cali Maxamuud | Xubin | [signature] |
| 6 | Xil. Jawaahir Maxamed Axmed Rooble | Xubin | [signature] |
| 7 | Xil. Khadra Axmed Maxamed Ciid | Xubin | |
| 8 | Xil. C/laahi Faarax Mire Muuse | Xubin | [signature] |
| 9 | Xil. Ifraax Maxamed Cawad Cali | Xubin | [signature] |
| 10 | Xil. Maryan Macalim Isxaaq | Xubin | [signature] |
| 11 | Xil. Qaladla' Cali Cawaale | Xubin | [signature] |
| 12 | Xil. Aamina Maxamed Mursal | Xubin | [signature] |
| 13 | Xil. Shariif Maxamed Cabdalla | Xubin | |
| 14 | Xil. Xil. Siciid Cali Muuse | Xubin | |
| 15 | Xil.Dr. C/rashiid Maxamed Nuur (Jilley) | Xubin | |
| 16 | Xil. Muqtaar Axmed Xasan Saajid | Xubin | |
| 17 | Xil. Maryan Maxamed Cali | Xubin | [signature] |

Xoghaynta:
1) Cusmaan Suufi Cusmaan [signature]
2) Ayaan C/laahi Cali [signature]
3) Dr. Maxamuud Maxamed [signature]
3) Maxamed Cali Axmed (Zaad) [signature]

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO DARYEELKA BULSHADDA

# HINDISE SHARCIYEEDKA DAAWADA

## TUSMO

**CUTUBKA 1aad: QODOBBO GUUD ........................................................................ 4**

Qodobka 1aad:  Eray Bixin ........................................................................4

Qodobka 2aad: Magaca Sharciga ........................................................................8

Qodobka 3aad: Ujeeddooyinka Sharcigan ........................................................................8

Qodobka 4aad: Baaxadda Sharciga ........................................................................9

**CUTUBKA 2aad: DHISIDDA, AWOODAHA IYO MAAMULKA HAY'ADDA DAAWADA IYO AGABKA CAAFIMAADKA SOOMAALIYA ..................................... 10**

Qodobka 5aad: Dhisidda Hay'adda ........................................................................10

Qodobka 6aad: Awoodaha Hay'adda ........................................................................10

Qodobka 7aad: Qaab-dhismeedka Hay'adda ........................................................................13

Qodobka 8aad: Dhismaha Golaha Hay'adda ........................................................................13

Qodobka 9aad: Waajibaadka Golaha ........................................................................15

Qodobka 10aad: Gunnada Xubnaha Golaha ........................................................................15

Qodobka 11aad:Kulamada Golaha ........................................................................16

Qodobka 12aad: Mudda Xileedka Golaha Hay'adda: ........................................................16

Qodobka 13aad: Sababaha xubinimada Golaha Hay'adda  lagu waayi karo ........................16

Qodobka 14aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiisyada Hay'adaha ee Maamul Goboleedyada Dalka (Delegation of Powers) ........................................................16

Qodobka 15aad: Magacaabista Maareeyaha iyo Ku-xigeenka Hay'add ..............................17

Qodobka 16aad: Shuruudaha Maareeyaha iyo Maareeya Ku Xigeenka Hay'adda .............17

Qodobka 17aad: Waajibaadka Maareeyaha Hay'adda ........................................................17

Qodobka 18aad: Waajibaadka Maareeye ku-xigeenka Hay'adda .......................................18

Qodobka 19aad: Aasaasidda Waaxyaha Hay'add ........................................................19

Qodobka 20aad: Magacaabidda Guddiyo Farsamo ........................................................19

Qodobka 21aad: Aasaasidda Guddiga Cabashooyinka........................................................19

Qodobka 22aad: Miisaaniyadda Hay'adda ........................................................19

Qodobka 23aad: Buugga Xisaabeedka Hay'adda ........................................................20

**CUTUBKA 3aad: QODOBO KALA DUWAN ........................................................ 21**

Qodobka 24aad: Awoodaha Saraakiisha Fatashaadda Hay'adda ........................................21

Qodobka 25aad: Ku-Dhigista Sumad ama Calaamadda Daawada (Labelling) ....................21

Qodobka 26aad: Mamnuucidda Daawada iyo Agabka Caafimaadka ee Tayadeedu hoosayso

ama Been-Abuurka ah....22
Qodobka 27aad: Xaddididda iyo Mamnuucidda Hawlaha Ka Baxsan Baaxadda Ruqsadda ....22
Qodobka 28aad: Dambiyada ka dhasha Ka Ganacsiga Sharci-darrada ah ee Daawada....22
Qodobka 29aad: Dawooyinka Maanka Dooriya iyo Kuwa Dhimirka (Daawooyinka La xakameeyo)....23
Qodobka 30aad: Guddiga Dabagalka Iyo Qiimeynta Hay'adda....25
Qodobka 31aad: Ilaalinta Xogta Sirta....25
Qodobka 32aad: Baabi'in ....25
Qodobka 33aad: Dhaqangalka Sharcigan ....25

# CUTUBKA 1aad

## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Eray Bixin

1) **Baakadeyn/Weelayn (Container):** waxaa loola jeedaa nidaamka lagu galaynayo daawada, iyo Agabka Caafimaadka si loogu keydiyo, loogu daabulo ama lagu qaado, looguna iibiyo iyadoo aan waxyeelo soo gaarin daawada,ama agabka caafimaadka laguna caddaynayo korkiisa xogta lagama maarmaanka ah ee ku saabsan waxa kujira weelkaas.

2) **Been abuur (falsified):** waxaa loola jeedaa daawada iyo agabka caafimaadka oo si ulakac ah asalkeedii looga been sheegay sida magaca, baakadda, sumadda iyo warshadda daawada soo sameysay, imw.

3) **Tayada Daawada:** waxaa loola jeedaa in la hubo waxtarka iyo waxyeelo la'aanta iyo wax ku oolka daawada iyo agabka caafimaadka..

4) **Tijaabada daawada (clinical trial):** waxaa loola jeedaa tijaabada daawada iyo agabka caafimaadka ayadoo lagu tijaabinayo noolaha , lagana rabo in la ogaado waxtarka iyo waxyeelada xun ay ku yeelan karaan, iyo sida ay ula falgalayaan jirka noolaha.

5) **Xirfadlayaasha Caafimaadka (Health Professional):** waxaa loola jeedaa cidkasta ee baratay mid ka mid ah maadoyinka xariirka la leh caafimaadka haystana ruqsad cadaynaysa xirfadiisa aqooneed. Gu

6) **Daawada(Medicines):** waxaa loola jeedaawalax ama isku-dar walxo kiimiko, dabiici, nool (biological), ama isku-dhaf ah oo loo isticmaalo in lagu daaweeyo, looga hortago, lagu baaro, ama lagu yareeyo calaamadaha cudur ee ku dhaca bini'aadamka ama xayawaanka..

7) **Daawooyinka iyo Agabka Caafimaadka(Health Products and Technologies)** waxaa loola jeedaa, sharcigan awgiis, daawooyinka, daawooyinka bayoolojiga, qalabka caafimaadka, daawooyinka dhireedka, cuntada daawaysan, walxaha caafimaadka saameeya (sida tubaakada, qaadka, shiishada iyo noocyada kala duwan ee tubaakada), iyo agabka la isku qurxiyo — kuwa daawayn leh iyo kuwa aan daawayn lahayn — kuwaas oo dhammaantood lagu nidaaminayo ama lagu xakameynayo iyadoo la raacayo sharcigan iyo xeerarka nidaamiyeyaashiisa.

8) **Daawooyinka Baayoolojiga (Biologicals)** waxaa loola jeedaa Tallaalka, dhiigga, qeybaha dhiigga iyo dhamaan daawooyinka kuwa laga sameeyo tiknoolojiyad ahaan baayoloji (recombinanta DNA technology, gene therapy, somatic cells and Tissue etc.).

9) **Daawo dhireed (Herbal Medicines**)waxaa loola jeedaa daawo laga sameeyo dhir ama qaybo ka mid ah dhirta (sida caleenta, jiridda, miraha, geedaha, ama xididdada), taas oo loo isticmaalo in lagu daaweeyo, looga hortago, ama lagu yareeyo calaamadaha cudur ee ku dhaca bini'aadamka.

10) **Daawooyinka La xakameeyo ( Controlled Substance)** waxaa loola jeedaa daawo ama kiimiko ah oo ay dawladdu sharci ahaan xakameyso sababtoo ah waxay saameyn ku leedahay habdhiska neerfaha, waxayna yeelan kartaa halis qabatin ama isticmaal khaldan waxaana ka mid ah (Narcotic drugs, Psychotropic substances and Precursors).

11) **Daawada Maanka doorisa (Narcotic Drugs)** waa walax dabiici ah ama kiimiko oo saameeya nidaamka dhexe ee neerfaha (CNS), loona isticmaalo yareynta xanuunka ama hurdo gelinta, balse leh halis ku saabsan qabatinka iyo isticmaal xad-dhaaf ah. Waxay ka mid yihiin daawooyinka laxakameeyo ee ku tixan jadwalka Maandooriyeyaasha ee Heshiiska Caalamiga ah ee 1961.

12) **Daawooyinka maskaxda saameeya (Psychotropic agents)** waa walxo kiimiko ama dabiici ah oo saameeya nidaamka dhexe ee neerfaha (CNS), iyagoo beddela maskaxda, niyadda, fikirka ama dabeecadda bini'aadamka, waxaana lagu daraa jadwalka maandooriyeyaasha ee caalamiga ah.

13) **Daawada tayadeedu hooseyso (sub-standard Health products):** waxaa loola jeedaa daawada, iyo agabka Caafimaadka oo ka hooseeya heerkii tayo ay sheegatay shirkadda soo samaysay ama aan waafaqsanayn heerarka caalimiga ah ee loogu talagalay.

14) **Daawo-yaqaan (pharmacist):** Waxaa loola jeedaa cid kasta oo si dhammeystiran u baratay cilmiga daawada (Pharmacy), haysatana shahaado jaamacaadeed (Bacholar) isla markaana leh ruqsad caddeyneysa xirfadiisa.

15) **Soo-celinta Daawada (Recall)** waxaa loola jeedaa hab nidaamsan oo lagu joojinayo ama lagu soo celinayo daawada iyo agabka caafimaadka oo suuqa ku jirta, taas oo laga helay cillad ama halis caafimaad, ama aan waafaqsanayn shuruudaha tayada, badqabka, ama waxtarka daawada iyo agabka caafimaadka laga rabay.

16) **Waxyeelo la'aanta daawada (safety of drug**) waxaa loola jeedaa daawada iyo agabka caafimaadkain aysan waxyeelo khatar ah ama halis ku ah caafimaadka aadanaha oo ay ka dhalato isticmaalkeeda.

17) **Keydinta daawada(Storages of Health Products):** waxaa loola jeedaa ku keydinta daawada iyo agabka caafimaadka goob ku haboon sida baqaar lagu keydiyo ama farmashiye.

18) **Saraakiisha Fatashaada (Inspectors)** waxaa loola jeedaa shaqaale ka tirsan Hay'adda oo qoraal oggolaansho iyo mid awood siin ka haysta hay'adda, si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo, una dabaqaan qodobka 36aad ee sharciga qaranka ee daawada.

19) **Soo dajin (Import)** waxaa loola jeedaa daawada iyo agabka Caafimaadka oo dalka dibaddiisa laga keeno.

20) **Sheybaarka Daawada (Drug Laboratory)**:Waxaa loola jeedaa xarun ama goob si gaar ah loogu qalabeeyey lana ruqsadeeyey oo lagu sameeyo baaritaanka, falanqaynta, iyo xaqiijinta tayada daawooyinka iyo agabka caafimaadka, si loo hubiyo inay buuxiyaan shuruudaha tayada, badbaadada, iyo waxtarka ee lagu dejiyey xeerarka iyo tilmaamaha hay'adda nidaamisa.

21) **Shirkadda daawada (entity)** waxaa loola jeedaa shirkadaha ka ganacsada ama sameeya daawada iyo agabka caafimaadkaee u baahan oggolaansha Suuq Keenista ama ruqsad ganacsi.

22) **Cuntada daawaysan (Food Suppliments)** waxaa loola jeedaa cuntda daawaysan ee loogu talagay in lagu kordhiyo cunnada caadiga ah, iyadoo la siinayo nafaqooyin ama walxo kale oo saameyn nafaqo ama jir ahaaneed leh, loona isticmaalin daaweynta, bogsinta, ama ka hortagga cudur.

23) **Ganaax (Penalty**)waxaa loola jeedaa Ciqaab lacageed ama sharciyeed oo lagu soo rogo qof ama hay'ad ku xad-gudba shuruucda iyo xeerarka nidaaminta.

24) **Golaha/Goluhu (Board):** waxaa loola jeedaa Golaha Hay'adda Hay'adda Daawada iyo Agabka Caafimaadka Soomaaliya.

25) **Qalabka caafimaadka( Medical devices)** waxaa loola jeedaa qalab kasta, mashiin, agab, alaab, software, ama walxo kale oo soo saaraha u talagalay in lagu isticmaalo keligood ama si wadajir ah ujeeddooyin sida: ogaan, ka hortag, kormeer, daaweyn, ama yareynta cudur, dhaawac, ama naafo ee bini'aadamka, iyadoo aan fal-celin daawo ah, difaac ama hab-metabolic ah loo adeegsan.

26) **Qaybiye Daawada (Distributor)** waxaa loola jeedaa Qof, shirkad, ama hay'ad ka shaqeysa qaybinta iyo kaydinta daawooyinka iyo alaabooyinka caafimaadka iyadoo raacaysa shuruudaha nidaaminta, laakiin aan soo saarin alaabta.

27) **La-socodka Badbqabka Daawada iyo agabka caafimaadka (Pharmacovigilance**) waxaa loola jeedaa cilmi iyo hawlo la xiriira ogaanshaha, qiimeynta, fahamka, iyo ka hortagga

waxyeellada ka dhalata daawooyinka ama dhibaatooyin kale oo la xiriira isticmaalka daawada iyo agabka caafimaadka,

28) **Kormeerida goobaha** (**Inspection of Premises)** daawada waxaa loola jeedaa in la kormeero lana fiir-fiiriyo goobaha lagu iibiyo, lagu keydiyo daawada iyo agabka caafimaadka in ay tahay sidii laga rabay.

29) **La socashada daawada suuqa taala (post marketing surveillance)** waxaa loola jeedaa la-socoshada, kormeeridda daawada iyo agabka Caafimaadka ee suuqa yaala ee horey loo-siiyay oggolaashaha suuq keenista, taas oo ujeedadu tahay waa in la ogaado, qiimeeyo, fahmo, oo laga hortago waxyeelo ama dhibaatooyin tayada ah ee ka dhasha isticmaalka dhabta ah, si loo hubiyo badqabka, waxtarka, iyo tayada daawada iyo agabka caafimaadka..

30) **Lambarka Dufcadda(Batcha Number)** waxaa loola jeedaa aqoonsi gaar ah oo loo qoondeeyey tirada gaarka ah ee daawada iyo agabka caafimaadka ay shirkadda ama warshadda hal mar isla soo samaysay.

31) **Maareeye:** waxaa loola jeedaa agaasimaha Guud ee Hay'adda Daawada iyo agabka caafimaadka Soomaaliya .

32) **Muunad (sample):** waxaa loola jeedaa qeyb laga soo qaaday daawada, daawooyinka Baayoolojiga, qalabka caafimaadka, Badqabka- , Daawo dhireeda iyo agabka la isku qurxiyo ee la-rabo in la baaro, matali kara guud ahaan daawada, daawooyinka Baayoolojiga, qalabka caafimaadka, Badqabka , Daawo dhireeda iyo agabka la isku qurxiyo ee laga soo qaaday.

33) **Noolaha** waxaa sharcigaan dhaxdiisa loola jeedaa bani'aadamka iyo xoolaha.

34) **Walxaha caafimaadka saameeya** waxaa loola jeedaa qaadka, Tukaadada, iyo noocyadeeda kala duwan ee tubaakada sida sigaarka, shiishadda IWM

35) **Waxyeelada xun (adverse effect):** waxaa loola jeedaa waxyeelada aan loo baahneyn ee ka dhalata isticmaalka daawada, daawooyinka Baayoolojiga, qalabka caafimaadka, Badqab-qabka , Daawo dhireeda iyo agabka la isku qurxiyo.

36) **Warshadda (Manufacturer):** waxaa loola jeedaa warshadaha gudaha dalka ama dibaddisa ku yaala ee sameeya daawada, daawooyinka Baayoolojiga, qalabka caafimaadka, Badqab-qabka , Daawo dhireeda iyo agabka la isku qurxiyo.

37) **Wasiirka (Minister):** wasiirka wasaaradda caafimaadka iyo daryeelka bulshada ee Dowladda Federaalka soomaaliya.

38) **Habka wanaagsan ee daawo sameynta( Good Manufacturing Practice):** waxaa loola jeedaa nidaam ka kooban mabaadi', habraacyo, iyo heerar lagu hubinayo in daawada iyo agabka caafimaadka si joogto ah loo sameeyo, hubiyo, loona xakameeyo si ay u buuxiyaan heerarka tayada ee ku habboon isticmaalka loogu talagalay.

39) **Hay'adda( Authority):** waxaa Loola jeedaa Hay'adda daawada iyo agabka Caafimaadka Soomaaliya (Somali Health Products Regulatory Authority).

40) **Madaxbanaanida Hay'add (Autonomous Authority):** waxaa loola jeedaa Hay'ad sharci ah oo awood buuxda u leh go'aan maamul, maaliyadeed, iyo fulinta waajibaadkeeda.

41) **Agabka la isku qurxiyo (Cosmetics):** waxaa loola jeedaa agabka noocyadiisa kala duwan ee aadanuhu u isticmaalo is qurxinta iyo nadaafadda jirka oo ah kuwa daaweysan iyo kuwa aan daawaysnayn.

42) **Ogolaanshaha Suuqa (Market Authorization)** waxaa loola jeeda ogolaansho rasmi ah oo ay siiso hay'adda, taas oo u oggolaanaysa daawada iyo agabka caafimaadka in si sharci ah loogu sameeyo, soo dejiyo, qaybiyo, ama lagu iibiyo dalka.

## Qodobka 2aad
## Magaca Sharciga

Sharcigani waxaa lagu magacaabaa "Sharciga Hay'adda Daawada iyo Agabka caafimaadka Soomaaliya" ( Somalia Medicine and Health Products Regulatory Authority Act) waana sharci si joogto ah u maamulo,nidaamiyo daawada iyo agabka caafimaadka ee laga helo dalka Soomaaliya.

## Qodobka 3aad
## Ujeeddooyinka Sharcigan

Ujeedooyinka sharcigaan wuxuu aasaasayaa:

1) "Hay'adda Daawada iyo Agabka Caafimaadka Soomaaliya ( Somalia Medicine and Health products Regulatory Authority( SoMHPRA ).
2) Hubinta, ilaalinta, nidaaminat iyo xakameynta tayada, badqabka, waxtarka, helitaanka daawada, daawooyinka Baayoolojiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireeda, walxaha caafimaadka saameeya iyo agabka la isku qurxiyo.
3) Xaqiijinta, dabagalka Goobaha lagu sameeyo, kaydiyo iyo iibiyo Daawada iyo agabka caafimaadka .

4) Dhiirigelinta Ganacsatada soomaaliyeed inay furaan shirkado sameeya Daawo tayo leh si waafaqsan heerka caalamiga ah ee sameynta daawada
5) Samaynta wacyigelinta bulshada ee ku saabsan ka-hortagga ganacsiga sharci-darrada ah, qorista aan waafaqsanayn habraacyada caafimaadka, iyo sixun u isticmaalka daawada iyo agabka caafimaadka, si loo yareeyo halista caafimaad iyo waxyeellada bulshada.

## Qodobka 4aad
## Baaxadda Sharciga

Sharcigani wuxuu ka shaqeynayaa dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya(JFS), waxaana lagu dhaqayaa oo uu khuseeyaa:

1) Dhammaan Daawooyinka loo isticmaalo noolaha
2) Dhammaan daawooyinka Baayoolojiga loo isticmaalo noolaha
3) Dhammaan qalabka caafimaadka loo isticmaalo noolaha
4) Daawo dhireedka loo isticmaalo noolaha
5) Agabka aadanaha uu u isticmaalo is qurxinta iyo nadaafadda.
6) Cuntada daawaysan(Food Supplements)
7) Xakameynta waxkasta oo saamayn ku yeelan kara caafimaadka guud dadka (sida qaadka, tubaakada, noocyada kala duwan ee tubaakada: Sigaarka, Shiishadda, IWM).

# CUTUBKA 2aad
# DHISIDDA, AWOODAHA IYO MAAMULKA HAY'ADDA DAAWADA IYO AGABKA CAAFIMAADKA SOOMAALIYA

## Qodobka 5aad
## Dhisidda Hay'adda

1) Waxaa sharcigan lagu dhisayaa  Hay'ad, taas oo loogu yeerayo "Hay'adda Daawada iyo agabka Caafimaadka Soomaaliya" kana hawlgalaysa dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS), afka qalaadna loogu yeero "Somalia Medicine and Health Products Regulatory Authority- SoMHPRA"
2) Hay'addu waxay si madax-bannaan ugudanaysaa  (Autonomous) shaqadeeda oo leh shaqsiyad qaanuuneed, iyo awoodo maamul oo ay go'aan uga gaarayso waajibaadkeeda si waafaqsan sharcigaan, iyadoo hoos timaadda Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee JFS..
3) Xarunta Dhexe ee Hay'addu waa magaalo madaxda dalka ee Muqdisho.
4) Hay'addu waxay Xafiisyo  ku yeelanaysaa magaalo madaxeedyada  Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo gobolkii loo arko inuu muhiim u yahay.
5) Hay'adda Daawada iyo Agabka Caafimaadka Soomaaliya waxay leedahay sumad u gaar ah iyo shaqsiyad qaanuuneed, taasoo u oggolaaneysa inay dacweeyso ama lagu dacweeyo magaceeda, iyadoo la raacayo habraaca sharciga ee dacwadaha iyo difaaca hay'adaha dowladda..

## Qodobka 6aad
## Awoodaha Hay'adda

Iyadoo la raacayo ujeeddooyinka uu tilmaamayo Qodobka 3aad ee sharcigaan, Hay'addu waxay yeelan doontaa awoodda iyo waajibaadka soo socda:

1) **Oggolaanshaha Suuq-geynta/Suuq-keenista (Registration and Market Authorization):** Hay'addu waxay awood uleedahay inay qiimeyso, diiwaangeliso, oggolaato, hakiso ama kala laabato oggolaanshaha Suuq Keenista daawada iyo agabka Caafimaadka oo lagu suuqgeynayo Soomaaliya, isla markaana ay maamusho diiwaanka rasmiga ah ee daawada iyo agabka caafimaadka la oggolaaday.
2) **Ruqsad-siinta Goobaha Lagu sameeyo, iibiyo iyo lagu kaydiyo (Licensing Establishment):** Hay'addu waxay awood u leedahay inay ruqsad siiso, cusboonaysiiso, hakiso ama ka laabato goobaha ku hawlan Daawada iyo agabka caafimaadka, sida warshadaha Sameeya daawada, soo-dejiyeyaasha, dhoofiyeyaasha,

jumladleyda(whaleseller), qaybiyeyaasha (distributor) iyo tafaariiqleyda (farmashiyeyaasha),ee kuwa danta guud iyo kuwa gaarka loo leeyahayba.

3) **Fatashaada iyo Dhaqan-gelinta Sharciga (Inspection and Enforcement):** Hay'addu waxay awood u leedahay in ay fuliso kormeer joogto ah oo ku saabsan dhammaan goobaha iyo xarumaha la xiriira daawada iyo agabka caafimaadka, si loo xaqiijiyo u hoggaansanaanta habka samaynta (Good Manufucturing Practice),Habka kaydinta wanaagsan(Good Storage Practice), iyo Habka qaybinta wanaagsan (Good Distribution Practice) ee daawada iyo agabka caafimaadka, sidoo kale, Hay'addu waxay awood u leedahay in ay baaritaan ku samayso jebinta sharcigan iyo xeernidaamiyayaashiisa, isla markaana ay qaaddo tallaabo sharci ah oo waafaqsan si loo xaqiijiyo fulinta iyo dhaqan-gelinta waajibaadkeeda.
4) **Kormeerka Suuqa iyo Xakamaynta Tayada (Market Survallence and Control):** Hay'addu waa in ay samayso dabagalka iyo qiimeynta Daawada iyo agabka Caafimaadka suuqa taalo, iyadoo qaadaysa muunad lagu tijaabinayo shaybaar, isla markaana ay qaadayso tallaabooyin sharci ah oo ay ku jiraan dib suuq uga saaris (recall), joojin ama burburin(disposal) daawada aan tayo lahayn ama been-abuur ah.
5) Ilaalinta **Badqabka Daawada (Pharmacovigilance):** Hay'addu waxay awood u leedahay inay dhisto, ayna maamusho nidaam qaran oo lagu ilaalinayo, uruurinta xogta khatar la'aanta ama badqabka daawada iyo agabka caafimaadka, in ay falanqeeyso, wacyigeliso, kadibna maareeyso warbixinada la xiriira waxyeellada ka dhalata isticmaalka daawada iyo tallaalka. Sidoo kale, waa in shirkadaha Sameeya daawada lagu waajibiyaa inay Hay'adda la wadaagaan warbixinadaas, halka hawlwadeenada caafimaadka iyo bulshada guud ahaan lagu dhiirrigeliyo inay si iskood ah (voluntary) ula soo wadaagaan Hay'adda xogta waxyeellada daawada iyo agabka caafimaadka.
6) **Maamulka Tijaabooyinka Caafimaad (Clinical Trial Oversight):** Hay'addu waxay awood u leedahay in ay nidaamiso, oggolaato oo ay kormeerto tijaabooyinka caafimaad ee lagu sameeyo dalka si loo hubiyo waafaqsanaanta heerarka wanaagsan ee daawaynta (GCP) iyo anshaxa caafimaad.
7) **Shaybaarka Hubinta Tayada (testing):** Hay'addu waxay awood u leedahay in ay dhisto ayna maamusho shaybaar qaran ee lagu tijaabiyo,baaro daawada iyo agabka caafimaadka iyadoo la raacayo sharcigaan, xeer nidaamiyahiisa, habraacyadiisa iyo heerarka caalamiga ah hubinta Tayada Daawada.
8) **Xakamaynta Xayeysiinta iyo Dhiirrigelinta (Control of advertisement & Promotion):** Hay'addu waxay awood u leedahay n ay nidaamiso, oo ay xakameyso xayeysiinta iyo dhiirrigelinta la xariirta Daawada iyo agabka Caafimaadka si loo hubiyo in aysan marin-habaabin bulshada.
9) **Daawooyinka La Xakameeyo (controled Substances):** Hay'addu waa in ay nidaamiso soo dejinta, dhoofinta, samaynta, qaybinta iyo isticmaalka daawooyinka la xakameeyo iyadoo la raacayo shurcigaan, xeer nidaamiyayaashiisa iyo heshiisyada caalamiga ah.

10) **Xoojinta Nidaamka Maamulka Dawada (Strengthening Medicines Regulatory System):** Hay'addu waa in ay sii waddo horumarinta aqoonteeda, wadashaqeynta iyo iskaashiga hay'adaha kale ee gudaha iyo dibadda, iyo qiimeynta waxqabadka hay'adda iyadoo la raacayo heerarka iyo tilmaamaha caalamiga ah ee lagu qiimeeyo Hay'adaha Daawada.

11) Hay'addu waxay awood u leedahay inay qaado khidmad adeegyada ay bixiso, una isticmaasho shaqada hay'adda intiii loo qoondeeyo.

12) **Nidaaminta Walxaha Caafimaadka Saameeya:** Hay'addu waxay awood u leedahay in ay nidaamiso soo dejinta, soo saarista, qaybinta, xayeysiinta, calaamadaynta iyo iibinta walxaha caafimaadka saameeya sida jaadka,tubaakada iyo kuwa laga sameeyo ama la midka ah, iyadoo la raacayo xeerarka caafimaadka bulshada iyo heshiiska caalamiga ah ee xakamaynta tubaakada ee Hay'adda Caafimaadka Aduunka (WHO FCTC).

13) **Diyaarinta xeer-Nidaamiyaha iyo Habraacyada:** Hay'addu waa in ay samayso xeer-nidaamiyayaasha iyo habraacyada oo hagaya hawlaha nidaaminta shaqada iyadoo la raacayo awoodda uu sharcigan siinayo lana raacayo heerarka caalamiga ah ee nidaaminta Daawada iyo agabka caafimaadka.

14) Hay'addu inta aysan si rasmi ah u daabicin xeer-nidaamiyayaasha ku xusan farqadda (13) ee qodobkan, waa inay wada-tashi kala sameysaa dhammaan saamileyda uu xeer-nidaamiyuhu khuseeyo, oo ay ka mid yihiin hay'adaha dowladda, xirfadlayaasha caafimaadka, iyo ururrada ama shirkadaha ka ganacsada daawooyinka, si ay uga dhiibtaan talooyinkooda, una saxiixaa Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

15) **Ogglaansha Dufcadaha (Lot release) Tallaalka, Madooyinka Bayoolojikada iyo kimikada cuftooda wayntahay :** Hay'adda waa in ay xaqiijiso, qiimeyso, oo ay oggolaato sii deynta (lot release) dufcadaha tallaalaalka, maadooyinka bayoolojiga iyo kiimikaalka waawayn ka hor inta aysan dalka Soomaaliya soo galin, si loo hubiyo tayadooda, waxtarkooda iyo badqabka isticmaalkooda.

16) **Xakamaynta Soo-dejinta iyo dhoofinta :** Hay'adda waxay awood u leedahay in ay nidaamiso, oggolaato, oo ay kormeerto soo-dejinta iyo dhoofinta Daawada iyo agabka caafimaadka iyo goobaha dalka laga soo galo iyagoo kaa shanaya hay'adaha furdada si loo xaqiijiyo in daawadu tahay ay kuwa diiwaangashanaa, oggolaansho soo dajin haysta, tayo leh, badqaba, isla markaana waafaqsan shuruucda dalka iyo heshiisyada caalamiga ah.

17) **Nidaaminta iyo xakamaynta maadooyinka lagu badalayo Caanaha Naaska hooyada (Breast-Milk Substitutes):**Hay'addu waxay awood u leedahay nidaaminta iyo xakamaynta soo dejinta,dhoofinta, qaybinta, suuq-geynta, iyo calaamadeynta maadooyinka lagu badalayo caanaha naaska hooyada iyo waxyaabaha la xiriira, iyadoo la waafajinayo Xeerka Caalamiga ah ee Suuq-geynta Nafaqo-Badallada Caanaha Naaska iyo heerarka qaran, lana kaashaneysa Wasaaradda Caafimaadka si loo hubiyo u hogaansanaanta iyo wacyigelinta bulshada.

**18)** **Kala-saaridda Daawada:** Hay'addu waxay awood u leedahay inay kala saarto daawooyinka kuwa warqad-dhakhtar looga baahan yahay, kuwa si toos ah looga heli karo farmashiyaha, kuwa la xakameeyo, ama qaybaha kale ee lagama maarmaanka ah, waxayna soo saari

doontaa habraacyada lagu hagayo isticmaalka iyo qaybintooda si looga hortago waxyeello caafimaad oo bulshada soo gaarta.

19) **Iskaashi, Ku-tiirsanaan iyo Heshiisyo:** Hay'addu waxay awood u leedahay in ay la yeelato iskaashi, ku-tiirsanaan (reliance) iyo heshiisyo sharci ah hay'adaha Daawada ee dalalka kale, ururada caalamiga ah iyo kuwa gobolka, si loo fududeeyo fulinta waajibaadkeeda nidaaminta (implementing core regulatory functions), iyadoo loo marayo is-weydaarsiga macluumaadka, aqoonsiga natiijooyinka nidaaminta(mutual recognition) Daawada ee lagu kalsoonaan karo, iyo hirgelinta hawlaha wadajirka ah, iyadoo la ilaalinayo madax-bannaanida iyo danta caafimaadka guud ee Soomaaliya, loon maro habraaca heshiisyada ee dalku leeyahay.

20) **Soo saarista digniino:** Hay'addu waxay awood u leedahay inay soo saarto digniino la xariira xadgugubka sharcigaan iyo xeer nidaamayaashiisa, lana wadaagto Hay'adaha awoodda u leh ka jawaabista xadgudubyahadaas.

21) **La-talinta madaxda sare :** Hay'addu waxay kala talisaa Wasaaradda caafimaadka heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed iyo agaasinka Gobolka benaadir arrimaha ku saabsan maamulka, qorsha siyaasadda nidaaminta iyo maaraynta daawada iyo agabka caafimaadka.

## Qodobka 7aad
## Qaab-dhismeedka Hay'adda

Qaab-dhismeedka hay'addu waa:

1) Golaha Hay'adda (The Board Directors).
2) Maareeyaha Hay'adda ahna Xog-hayha Golaha.
3) Maareeye Ku xigeenka Koowaad
4) Maareeye ku Xigeenka Labaad
5) Agaasima waaxeeyada Hay'adda iyo Isuduwayaasha (Cheif Regulatory Officer) Xafiisyada Hay'adda ee Dowlad Goboleedyada.
6) Shaqaalaha kale ee Hay'adda
7) Guddiyada Farsamo ee Hay'adda.
8) Lataliyaasha Hay'adda.

## Qodobka 8aad
## Dhismaha Golaha Hay'adda

1) Goluhu wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood oo magacaabistooda lagu saleynayey aqoon, hufanaan, karti, iyo khibrad si waafaqsan faqrada 3aad iyo 7aad ee qodobkaan.
2) Dhismaha xubnaha Golaha waa inuu ka tarjumayo:
    b) Baahida loo qabo aqoontiisa iyo khibraddiisa la xariirta nidaaminta Daawada iyo agabka caafimaadka taas oo ku salaysan tixraax cilmiyaysan.
    t) Matalaad nidaamka federaalka

3) Xubnaha Golaha Hay'adda waa:
b) Khabiir Sare, wakiil ka ah Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

t) Abuukaate sare oo ka socda sharci yaqaanada dalka, haysatan ruqsadda sharci dalka.

j) Khabiir Dawayaqaan ah (Pharmacists), kana diiwaangashan Golaha mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka lehna waayo aragnimo nidaaminta Qalabka caafimaadka((1).

x) Dhakhtar Caafimaad(Medical Doctor) oo leh waayo-aragnimo dhanka daaweynta, kana diiwaangashan Golaha mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka lehna waayo aragnimo nidaaminta Qalabka caafimaadka (1).

kh) Khabiir sare ee ku takhasusay Cilmiga Qalbka Caafimaadka(Biomedical engineering) ama bartay maadada kiimistiriga kana diiwaangashan Golaha mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka lehna waayo aragnimo nidaaminta Qalabka caafimaadka(1).

d) Wakiil ka socda Bulshada Rayidka, una dooda xuquuqda bulshada (patient rights advocate) isticmaasha daawada iyo agabka caafimaadka (1).

r) Hal Agaasime Guud oo ka socda Wasaaradaha Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee Dowlad-goboleedyada iyo Agaasinka Maamulka Gobolka Banaadir, sidoo kalena Golaha ku matalaya Dowlad Goboleedyada iyo Gobolka Benadir, Jagadani waa mid la is-beddelayo (rotational), waxaana sanadkiiba mar qabanaya mid ka mid ah Agaasimeyaasha Guud ee Dowlad-goboleedyada ama Agaasinka Maamulka Gobolka Banaadir.

s) Maareeyaha Hay'adda Daawada iyo Agabka Caafimaadka Soomaaliya ahna xoghayaha Guddiga.

Sh) Khabiir sare cilmiga daawada xoolaha wakiil ka ah Wasaaradda Xanaanaha Xoolaha JFS lehna waayo aragnimo nidaaminta Qalabka caafimaadka((1).

4) Xubnaha Golaha ee uu sharcigaan tilmaamayo waxaa soo xula Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka JFS, iyadoo la waafajinayo faqradaha 2aad iyo 3aad iyo 7aad ee qodobkaan, waxaana xubnahaas loo soo gudbinayaa Golaha Wasiirada JFS si ay u meel-mariyaan.
5) Goluhu kulankooda ugu horreeya waxay iska dhex dooranayaan Guddoomiye iyo Guddoomiye Ku-xigeen, iyadoo kulankaas ay goob joogtahay ayna agaasimayso Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
6) Maareeyaha Hay'adda ayaa noqonaya xoghayaha Golaha, una qaadaya qoraalada Kulankooda.
7) Xubnaha Golaha waa in ay ahaado muwaadin Soomaali ah, oo aan lahayn dano is diidan (conflict of interest) oo ka hor imaanaya shaqada hay'adda, kuna shaqaynayaan kartidooda iyo aqoontooda shaqsiyeed, kumana matalaan Golaha aragtida hay'adahii ay ka tirsanaayeen, si hufan loogu adeego bulshada Soomaaliyeed.

## Qodobka 9aad
## Waajibaadka Golaha

Waajibaadka Golaha Hay’adda waxaa ka mid ah:

1) Goluha wuxuu sameyaa shaxda siyaasadaha iyo qorsheyaasha hay’adda iyagoo ku salaynaya hababka caalamiga ah, kuwa gobolka iyo kan dalkaba asagoo la tashanayo Wasaardda caafimaadka ee Dowladda Soomaaliya.
2) Goluhu si uu u hubiyo maamul wanaagga iyo isla-xisaabtanka hay’adda, wuxuu kormeeraa hirgelinta shaqada iyo wax qabadka Hay'adda.
3) Goluhu wuxuu ansixiyaa qorshe-hawleedka sanadlaha ah iyo miisaaniyadda Hay’adda.
4) Goluhu wuxuu soo saarayaa Xeernidaamiyayaasha loo baahanyahay ee khuseeya hawlaha hay'adda si waafaqsan sharcigaan, waxuuna u soo gudbinayaa Wasiirka wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada JFS si uu u saxiixo.
5) Kormeerista iyo qiimeynta dhammaan hawlaha iyo waaxyaha Hay’adda, si loo hubiyo waafaqsanaanta qorshayaasha, siyaasadaha iyo waajibaadka sharci ee lagu dejiyay sharcigan.
6) Gudashada shaqooyinka kale ee waafaqsan mabaadi’da sharcigan iyo xeer-nidaamiyayaasha ka dhasha, ama kuwa loogu igmado sharci kale, si waafaqsan qodobbada iyo ujeeddooyinka sharcigan.
7) Goluhu, Waa inuu warbixinta Hay’adda siiyaa Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka Federaalka iyo Wasaaradaha Caafimaadka ee xubnaha Ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya isgagoo u marsiinaya Wasiirka.
8) Golaha Hay’adda wuxuu awood u leeyahay in uu magacabo xubno khubara ah ee ka tala siiya arimaha ay ka shirayaan, iyagoo ku casuumaya kulamadooda marka ay u baahdaan, codna kuma lahan.
9) Go’aanada ka soo baxa shirka golaha waxaa saxiixaya gudoomiyaha Golaha ee hay’adda ama gudoomiye ku xigeenka, haddii uu maqan yahay gudoomiyaha.

## Qodobka 10aad
## Gunnada Xubnaha Golaha

Xubnaha Golaha malahan mushaaar, marka laga reebo gunno ku saleysan qabashada hawlaha hay’adda oo loo yaqaano “gunno-hawleed” oo la siinayo marka ay xubnuhu kulamada Golaha ka qeyb galayaan. Gunnadaas waxaa lagu qeexayaa Xeer-hoosaad ay Hay’addu soo saari doonto.

## Qodobka 11aad

## Kulamada Golaha

1) Goluhu waxaa uu yeelan karaa fadhi caadi ah oo laba jeer sanadkii ah iyo mid aan caadi ahayn.
2) Hay;adda ayaa xeer hoosaad ku soo saaraysa, kulamada Golaha.

## Qodobka 12aad

## Mudda Xileedka Golaha Hay'adda

Muddada xil haynta Golaha Hay'adda waa Shan (5) sano, waana la soo magacaabi karaa mar kale,

## Qodobka 13aad

## Sababaha xubinimada Golaha Hay'adda lagu waayi karo

Sababaha xilka lagu waayi karo waa:

1) Is-casilaad uu u soo gudbiyo, Gudoomiyaha ka aqbalo ;
2) Caafimaad-darro keeni karta gudasho la'aan waajibaadkiisa;
3) In ay geeri ku timaado;
4) Ku-xad-gudub xeer-hoosaadyada hay'adda iyo shuruucda kale ee dalka.

## Qodobka 14aad

## Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiisyada Hay'adaha ee Dowlad Goboleedyada Dalka (Delegation of Powers)

1) Xafiisyada Hay'adda ee Dowlad-Goboleedyada, sida ku xusan Qodobka 5aad, faqraddiisa 4aad, waxaa la siinayaa awoodaha iyo waajibaadka lagama maarmaanka u ah bixinta adeegyada Hay'adda ee heer Dowlad-Goboleed iyo heer Degmo, iyadoo faahfaahintooda lagu nidaaminayo xeer-nidaamiye.
2) Adeegga ay bixinayso Hay'addu waxuu noqonayaa mid isku xiran oo leh hal saldhig xogeed (central Data base), sidaa darteed cidkasta oo adeeg Hay'adda uga baahan sida ruqsadaha kala duwan waxay ka soo codsanaysaa xarunta ugu dhaw ee ay Hay'addu ku leedahaya guud ahaan Dalka Soomaaliya waxuuna bixin doonta khidmad adeegga uu codsaday.
3) Maamulka Xafiisyada Hay'adda ee Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah DFS waa:

b. Isuduwaha Xafiiska Hay'adda ee Dowlad Goboleedyada (cheif regulatory officer)

t. Saraakiil Fataashaad ee hay'addu u baahantahay oo leh aqoon la xariirta shaqadaas.

j) Sarkaalka u qaabilsanaha la socoshada waxyeeladda Daawada iyo agabka caafimaadka.

## Qodobka 15aad

## Magacaabista Maareeyaha iyo Maareeye Ku-xigeenada Hay'adda

Maareeyaha iyo Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda waxay ku imaanayaan sida soo socota:

1) Qofka qabanaya jagada Maareeyaha ama Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda waa in si furan loogu tartamaa, xulistiisana lagu saleeyaa shuruudaha lagama maarmaanka u ah ee ku xusan Qodobka 16aad ee sharcigan, Kadibna qofka ugu mudan uu Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee Dowladda Federaalka Soomaaliya horgeeyaa magacaabistiisa Golaha Wasiirrada Dowladda Federaalka Soomaaliya si loo ansixiyo.
2) Xilka qaadista Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka Hay'adda waxaa loo marayaa habkii lagu soo magabaabay.

## Qodobka 16aad

## Shuruudaha Maareeyaha iyo Maareeya Ku Xigeenada Hay'adda

Maareeyaha iyo Maareeye Ku-xigeenada Hay'adda waa in ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

1) Waa inuu yahay muwaadin Soomaali ah oo haysta dhalashada Soomaaliyeed;
2) Waa inuusan hore Maxkamad ugu xukumin dambi;
3) Waa inuu haystaa shahaadada cilmiga daawada (Pharmacy or Pharmaceutical Science), ugu yaraanna leeyahay/leedahay waayo-aragnimo todoba (7) sano ah oo ku saabsan maamulka iyo iyo nidaaminta daawada iyo agabka caafimaadka; ama
4) Waa inuu haystaa shahaadada Dhaqtarnimada (Medical Doctor) ama Caafimaadka Dadweynaha (Public Health), isla markaana uu leeyahay shahaado sare oo cilmiga daawada ah (Post-graduate in Pharmaceutical Sciences), ugu yaraanna leeyahay/leedahay waayo-aragnimo todoba (7) sano ah oo dhanka maamulka iyo nidaaminta daawada iyo agabka caafimaadka; ama
5) Waa inuu ahaadaa qofkas oo haystaa shahaado sare (Post garduate in pharmaceutical sceince) ee la xariirta maamulka iyo nidaaminta Daawada iyo agabka caafimaadka leeyahay/leedahay khibrad iyo waayo-aragnimo todobo (7) sano ah ee la xatiirta shaqadaan.

## Qodobka 17aad

## Waajibaadka Maareeyaha Hay'adda

Waajibaadka maareeyaha hay'adda waa:

1) Mareeyaha Hay'adda wuxuu ilaaliyaa, sidoo kalena kormeeraa dhammaan hawlaha Hay'adda, wuxuuna hubiyaa in si wanaagsan loo fuliyay sharciga, xeerarka, siyaasadda iyo ha raacyada ay Hay'adda iyo Goluhu ansixiyeen.

2) Maareeyaha Hay’adda wuxuu mas'uul ka yahay fulinta go'aannada iyo tilmaamaha Golaha iyo in uu Wasiirka usoo gudbiyo warbixinnada hay’adda saddexdii biloodba mar iyo warbixin sanadeedka isagoo umarinaya Golaha.
3) Maareeyaha waxuu Awood u leeyahay magacaabista, dalacsiinta, iyo isku badalidda, dhammaan shaqalaha hay’adda si waafaqsan sharciga shaqalaaha rayidka Soomaaliyeed.
4) Maareeyaha Hay’adda wuxuu mas’uul ka yahay hirgelinta dhamaan hawlaha Hay'adda ay maamusho sida ku cad Sharcigan, wuxuuna u gudbiyaa Golaha hay’adda.
5) Mareeyaha Hay’adda ayaa mas’uul ka ah maamulka arrimaha hay’adda oo ay ku jirto maamulka iyo maareeynta shaqaalaha.
6) Maareeyuhu waa inuu u gutaa awoodaha iyo waajibaadka Hay’adda, sida ku cad Qodobbada sharcigan.
7) Maareeyuhu waa inuu fuliyaa miisaaniyaddii Goluhu u ansixayay Hay’adda si waafaqsan qorshe hawleedka loogu talagalay.
8) Maareeyuhu wuxuu hay’adda ku matalaa dhammaan shaqooyinka kala dhaxeeya dhinacyada Saddexaad (third party).
9) Maareeyaha Hay’adda waa Xoghayaha Golaha hay’adda, wuxuuna sameeyaa dhamaan waajibaadka hay’adda u idmato ama sharciga ama Goluhu uu faro.
10) Maareeyaha waa in uu diyaariyaa qorshe hawleedka sanad laha ah iyo miisaaniyadda hay’adda, una gudbiyaa Golaha, kaddibna hirgaliyaa qorshihii uu Golahu soo ansixiyay, iyadoo la raacayo hanaanka miisaaniyadda Dowladda Soomaaliya.

## Qodobka 18aad

## Waajibaadka Maareeye ku-xigeenka Hay’adda

1) Maareeya ku-xigeenku waxa uu qabtaa hawlaha uu wakiisho Maareeyaha hay’adda.
2) Waxa uu buuxiyaa xilka Maareeyaha Hay’adda marka uu maqan yahay ama ay ku timaado caafimaad darro uu xilkiisa la gudan waayo.

## Qodobka 19aad

## Aasaasidda Waaxyaha Hay'adda

1) Hay'addu waxay dhisaysaa xafiisyo, waaxyo, qaybo iyo unugyo kale oo lagama maarmaan u ah fulinta waajibaadkeeda iyo hawlaheeda si hufan.

2) Qaab-dhismeedka iyo shaxda maamulka (organogram) ee Hay'adda, oo ay ku cad yihiin waajibaadka iyo masuuliyadaha xafiisyadeeda ku yaalla dowlad-goboleedyada, waaxyaha maamulka ama qaybaha-hoosaad, waxaa lagu dhisayaa si waafaqsan baahiyaha istaraatiijiyadeed iyo kuwa hawlgal ee shaqada Hay'adda.

## Qodobka 20aad

## Magacaabidda Guddiyo Farsamo

Maareeyaha Hay'adda ayaa magacaabaya guddiyo farsamo oo Hay'addu leedahay, isagoo la tashanaya agaasime waaxeedyada, hadba intii Guddi iyo xubno ee loo baahdo.

## Qodobka 21aad

## Aasaasidda Guddiga Cabashooyinka

1) Hay'addu waxay dhisaysaa Guddiga Cabashooyinka si uu dib u eego ugana go'aamiyo cabashooyinka ay soo gudbiyaan codsadeyaasha ama hay'adaha la nidaamiyo (regulated) ee ka cabanaya go'aannada maamulka ee Hay'adda.

2) Guddigu Cabashooyinka wuxuu u shaqaynayaa si madaxbannaan, wuxuuna ka koobnaanayaa xubno kala ah khabiir sharci iyo xubno farsamo.

3) Hay'addu waxay diyaarinaysaa Xeer nidaamiye lagu qeexayo habka cabashada iyo muddada ay qaadanayso.

4) Go'aannada Maamuul ee hay'adda, waxaa ka furan cabasho iyo racfaan si wafaaqsan sharcigaan iyo shuruucda dalka. .

## Qodobka 22aad

## Miisaaniyadda Hay'adda

1) Miisaaniyadda Hay'adda waxa ay ka imaaneysaa ilahan soo socda:

b) khidmadaha laga qaado adeegga ay bixiso hay'addawaa in qeyb kamid ah khidmadaas lagu celiyaa hay'adda si shaqada hay'addu usocoto.

t) Miisaaniyadda guud ee dowladda.

j) Dakhliga ay Hay'adda ka hesho deeqa bixiyayaasha.

2) Adeegsiga lacagaha Hay'adda waa in la waafajiyaa ujeedooyinka Sharcigan, lagana ilaaliyaa in aan loo isticmaalo danaha gaarka ah.

3) Hay’adda waxay u madax bannaan tahay maamulka miisaaniyaddeeda ayadoo raacaysa sharciga maamulka miisaaniyadda Dowladda (PFM Law).

## Qodobka 23aad

## Buugga Xisaabeedka Hay’adda

1) Hay’addu waxay yeelanaysaa Akoontiyo iyo buug xisaabeed oo sax ah oo dhamaystiran si waafaqsan nidaamka Maaliyadeed Dowladda Federaalka Soomaaliya.

2) Buugaagta xisaabaadka iyo dukumeentiyada dhaqaalaha ee Hay'adda, waa in uu hubiyaa markii loo baahdo xafiiska hanti-dawrka guud ee Qaranka.

3) Buugaagta lacag qabashada khidmadda hay’addu ka qaadayso adeegyada waxa ay ka imaanayaan xafiiska Xisaabiyaha Guud ee DFS.

# CUTUBKA 3aad
# QODOBO KALA DUWAN

## Qodobka 24aad

## Awoodaha Saraakiisha Fatashaadda Hay'adda

1) Hay'addu waxay magacaabaysaa saraakiil Fatashaad heer Federaal, heer maamul-goboleed iyo heer degmo, si loo fuliyo qodobka 6aad, faqradiisa 3aad ee sharcigan.

2) sharcigaan waxuu awood buuxda siinayaa saraakiisha Fatashaada Hay'adda si ay u gutaan waajibaadkooda iyo shaqooyinkooda lagu qeexay sharcigan, iyo xeerarka kale ee Hay'adda.

3) Waxay saacad kasta geli karaan goob kasta ee ay aaminsan yihiin in lagu sameynayo, lagu baakadeynayo, dib-loogu baakadeynayo, lagu gadaayo ama lagu keydinayo daawada, iyo agabka caafimaadka kaddibna ka soo qaadaan muunad si ay u hubiyaan tayada si waafaqsan Sharcigaan.

4) Saraakiisha Fatashaadu waxay hubinayaan shahaadada oggolaashaha suuq keenista, ruqsadda Goobta iyo dhammaan dukumintiga yaala goobta ganacsiga daawadaiyo agabka caafimaadka iyo goobaha laga soo dajiyo, laga dhoofiyo daawada ama lagu sameeyo ee dalka gudihiisa ah.

5) Saraakiisha fatashaadu waxay furi karaan, baari karaan kartoon kasta ay ku tuhmaan in ay kujirto daawada, iyo agabka caafimaadka marka la soo galinayo dalka sida dekadaha iyo Garoomaada iyo goobaha kale ee loo asteeyo inay ka soo dajin karo.

6) Saraakiisha Fatashaadu waxay qaban karaan , joojin karaan daawo iyo agab caafimaad kasta oo ay u haystaan sabab macquul ah oo lagu tuhmo inay ku jiraan walxo mamnuuc ah oo xad gudub ku ah sharcigaan.

7) Saraakiisha fatashaadu waxay la wareegayaan daawada, iyo agabka Caafimaadka oo lagu helo caddeymo muujinaya in ay ku jiraan wax kasoo horjeeda sharcigaan.

8) Saraakiisha Fataashaadu waxay awood u leeyihiin inay xiraan goobtii lagu helo wax kasoo horjeedo sharcigaan.

9) Dhamaan saraakiisha Fatashaada ee lagu magacaabay sharcigan waa inay raacaan anshaxa iyo asluubta ay dajisay Hayaddu iyo Shuruucda Dalka.

## Qodobka 25aad
## Ku-Dhigista Sumad ama Calaamadda Daawada (Labelling)

1) Daawo kasta waa in si cad loogu qoraa baakaddeeda, weelkeeda, ama galkeda—ha ahaato warqad, maro, ama wax kasta oo kale oo ay ku jirto—qoraal qeexaya nooca daawada iyo waxa ay tahay.
2) Lama soo dhoofin karo, iibin karo, lagumana qayb-gelin karo dalka gudihiisa daawo ama

agab caafimaad aan si cad loogu sumadayn mid ka mid ah afafka: Af-Soomaali, Ingiriisi, ama Carabi.

3) Hay'adda ayaa diyaarinaysa oo soo saarayna xeer-nidaamiye iyo habraac faahfaahsan oo hagaya shuruudaha ku saabsan weelka, calaamadaynta (labelling), iyo macluumaadka waajibka ah ee daawada iyo agabka caafimaadka, si loo hubiyo waafaqsanaanta heerarka qaranka iyo kuwa caalamiga ah

## Qodobka 26aad
## Mamnuucidda Daawada iyo Agabka Caafimaadka ee Tayadeedu hoosayso ama Been-Abuurka ah

1) Sharcigaan ma oggola sameynta, soo dajinta, dhoofinta, bixinta, keydinta, qeybinta iyo iibinta daawada,iyo agabka Caafimaadka oo ku guul dareystay inay soo buuxiyaan heerka tayadii laga rabay iyo kuwa been-abuurka ah.

2) Hay'addu marka ay hubiso daawada, iyo agabka Caafimaadka ee soo buuxin waayey tayadii laga rabay waa in ay ku qaadaa sharcigaan waxaana laga mamnuucayaa in lagu iibiyo suuqa iyo in lagu isticmaalo dalka cidda soo galisay dalka ama soo sameysay daawadaiyo agabka caafimaadka) waxaa lagu qaadayaa si waafaqsan sharcigaan iyo xeer nidaamiyayaashiisa.

## Qodobka 27aad
## Xaddididda iyo Mamnuucidda Hawlaha Ka Baxsan Baaxadda Ruqsadda

1) Laga billaabo dhaqan-galka sharcigan, waxaa mamnuuc ah in shirkad kasta ama cid kasta ay ku iibiso ama ku shaqeyso daawada iyo agabka caafimaadka wax ka baxsan baaxadda ruqsadda ay haysato, oo ay ku jirto ruqsadda soo-dajinta, dhoofinta, jumladda, tafaariiqda, ama sameeynta.

2) Qof kasta ama shirkad kasta oo ku xad-gudubta faqrada 1aad ee qodobkan waxay galaysaa fal-dembiyeed ay ku mutaysanayso xabsi, ganaax, ama labadaba oo wada jira, iyadoo la tixraacayo Qodobbada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo sharciyada kale ee dalka ka dhaqan-gala ee la xiriira ganacsiga ee Dowladda Soomaaliya.

## Qodobka 28aad
## Dambiyada ka dhasha Ka Ganacsiga Sharci-darrada ah ee Daawada

1) Cid kasta ee ka ganacsata daawada, iyo Agabka caafimaadka iyadoo aan heysanin oggolaashaha suuq-keenista wuxuu galay fal-dembiyeed uu ku mutaysanayo xabsi ama ganaax ama labadoodaba oo wada jira, iyadoo la tixraacayo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Sharciyada kale ee dalka dhaqan- galka ka ah.

2) Daawa-yaqaan kasta ee ruqsad ganacsiga daawada haysta oo iibiya ama bixiya daawooyinka la xakameeyo in ka badan tiradii uu qoray dhaqtarka loo oggol-yahay inuu qoro, wuxuu galayaa fal-dembiyeed oo uu ku mutaysanaayo xabsi ama ganaax ama labadoodaba oo wada

jira, iyadoo la tixraacayo Qodobbada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Sharciyada kale ee dalka dhaqan-galka ka ah ee la xiriira ka ganacsiga maan-dooriyaha ama ku xad-gudubka aadanaha..

3) Cid kasta ee sameysa been-abuur daawada, iyo agabka caafimaadka sida barxidda, tayo dhimista iyo sumad ka bedelidda waxay galaysa fal-dembiyeed ay ku mutaysanayo xabsi ama ganaax ama labadoodaba oo wada jira, iyadoo la tixraacayo Qodobbada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Sharciyada kale ee dalka dhaqan-galka ka ah.

4) Ciddii iyadoo haysata shati daawada, iyo agab caafimaad oo diida ama is- hortaagta shaqada saraakiisha kormeerka Hay'adda, si uu uguto waajibaadkiisa ama u adeegsado awoodihiisa uu siinaayo sharcigaan, wuxuu galay fal-dembiyeed uu ku mutaysanayo xabsi ama ganaax ama labadoodaba oo wada jira, iyadoo la tixraacayo Qodobbada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Sharciyada kale ee dalka dhaqan-galka ka ah ee la xiriira ganacsiga.

5) Ciddii ruqsadeeda daawada ku wareejisa cid kale, wuxuu galaya fal-dembiyeed uu ku mutaysanayo xabsi ama ganaax ama labadoodaba oo wada jira, iyadoo la tixraacayo Qodobbada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Sharciyada kale ee dalka dhaqan-galka ka ah.

6) Ciddii ku guul dareysata inay u hoggaansato qodobada Sharcigaan ama xeerarka iyo hab-raacyada Hay'adda sameyso wuxuu galay fal-dembiyeed uu ku mutaysanayo xabsi ama ganaax ama labadoodaba oo wada jira, iyadoo la tixraacayo Qodobbada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Sharciyada kale ee dalka dhaqan-galka ka ah.

7) Ciddii soo dajisa ama dhoofisa daawooyinka la xakameeyo ama xaddi ka badan intii ay Hay'adda u oggolaatay waxay galaysaa fal-dembiyeed uu ku mutaysanayo xabsi ama ganaax ama labadoodaba oo wada jira, iyadoo la tixraacayo Qodobbada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Sharciyada kale ee dalka dhaqan-galka ka ah ee la xiriira ka ganacsiga maan-dooriyaha ama ku xad-gudubka aadanaha.

## Qodobka 29aad
## Dawooyinka Maanka Dooriya iyo Kuwa Dhimirka
## (Daawooyinka La xakameeyo)

1) Sharcigan ma oggola soo dajinta, dhoofinta, sameynta, keydinta, qeybinta, iibinta, bixinta(dispensing) daawooyinka la xakameeyo iyadoo aan Hay'adda laga haysan oggolaansho u gaar ah daawooyinkaas.

2) Shuruudaha lagu bixinayo oggolaanshaha gaarka ah ee loo isticmaalayo soo dajinta, sameynta, keydinta, qeybinta iyo iibinta daawooyinka la xakameeyo waxaa lagu qeexayaa xeer-nidaamiye ay sameyneyso Hay'adda, laguna sheegayo habka oggolaanshaha gaarka ah ee lagu soo saarayo, lagu cusbooneysiinayo, lagu ganaaxayo, laguna joojinayo.

3) Sharcigaan ma oggola in boosto (post office) loo isticmaalo soo dajinta iyo dhoofinta daawooyinka maanka dooriyo iyo kuwa dhimirka.

4) Sharcigaan ma oggola soo dajinta, dhoofinta daawooyinka maanka dooriyo iyo kuwa dhimirka iyadoo la isticmaalayo baakad daawo kale.

5) Sharcigaan ma ogola bixinta (dispensing), siinta (administering) daawooyinka la xakameeyo bukaanka marka laga reebo bukaankii haysta warqadda dhaqtarka rukhsadda u haysta in uu qoro daawooyinkaan.

6) Shuruudaha qorista “warqadda dhaqtarka”, bixinta iyo bukaan siinta daawooyinka la xakameeyo, waa in lagu qeexaa xeernidaamiye ay baahineyso Hay’adda, kaddib markii ay Wasaaraddu soo-diyaariso.

7) Liiska Daawooyinka la xakameeyo oo ku saleysan heerarka ay u kala khatarsan yihiin (schedule), waa in lagu qeexaa xeernidamaayaha ama hab-raaca ay Hay’adda sameeyneyso.

8) Wasaaradda Caafimaadka ee Federaalka Soomaaliya waa inay soo-saartaa xeer-nidaamiye ku saabsan dhaqtarka qori kara, daawa-yaqaanka bixin kara daawooyinka la xakameeyo iyo ilaalinta diiwaanka iyo ka warbixinta la xiriira daawooyinka la xakameeyo.

9) Daawooyinka la xakameeyo iyo qaan sheegadkooda, diiwaankooda iyo warqadda dhakhtarka waa in lagu keydiyaa khasnad ama khaanad bir ah oo la xeri karo ama qol gaar ah oo furahiisa uu mar walba ku jiro gacanta mihnadlaha (dawo yaqaanka) loo idmaday oo kaliya.

10) Daawooyinka la xakameeyo ee halaabay, dhacday ama la-qabtay waa in meel gaar ah la dhigaa, kaddibna la burburiyaa iyadoo la raacayo Sharcigaan.

11) Cid kasta oo ruqsad u haysata, waa inay ilaalisaa diiwaanka, una dirtaa warbixinnada ku saabsan isticmaalka daawooyinka la xakameeyo hay’adda, iyadoo la raacayo hab-raaca ay hay’addu dajisay.

12) Qodobada sharcigaan laga waayo waxaa loo raaci karaa axdiga maandooriyaha (Narcotic convention 1961 and its amended Protocol of1972) iyo Xeer nidaamiyihiisa ee ah sharci lambar 46 ee soo baaxay 1970.

13) Dhisidda Guddiga dhaxe ee la socoshada Daawooyinka la xakameeyo (Narcotic Board), ayada uu Wasiirka Caafimaadka JFS ku soo saarayo xeer nidaamiyo tilmaamaya shaqadooda iyo xafiisyada ay ka imaanayaan.

14) Hay’adda Daawada iyo agabka caafimaadka Soomaaliya ayaa ah cidda Soomaaliya uga mas’uulka ka ah nidaaminta la xiriirta soo dejinta, dhoofinta, soo saarista, qaybinta, isticmaalka, qorista, kormeerka iyo xakamaynta daawooyinka la xakameeyo, si waafaqsan sharcigan, shuruucda dalka iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya gashay, iyada oo kaashanaysa hay’adaha awooda u leh fulinta sharciga.

## Qodobka 30aad:
## Guddiga Dabagalka Iyo Qiimeynta Hay'adda

1) Golaha Hay'adda ayaa soo xulayo xeel- dheerayaal yaqaana nidaamka dabagalka iyo qiimeynta hawlaha la xiriira shaqada hay'adda oo kormeer iyo qiimeyn ku sameeya Hay'adda, waxaana Magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka JFS.

2) Guddiga dabagalka iyo qiimeynta waa inay u gudbisaa warbixinta wax qabadka Hay'adda Golaha iyo Wasiirka.

3) Hay'adda waa inay diyaarisaa warbixinno Sanadle ah, una gudbisaa Wasiirka iyadoo u soo marineysa Golaha.

## Qodobka 31aad
## Ilaalinta Xogta Sirta

1) Cidna ma bixin karto xogta Hay'adda ee la xiriirta shaqooyinkeeda ama arrimaheeda iyadoo loo adeegsanayo awoodaha iyo waajibaadka Hay'adda siisay si cid kale uga faa'iideysato xogtaas.

2) cidkasta oo bixisa xogta sirta ah ee hay'adda waxaa laga qaadayaa tallabo sharciga waafaqsan.

## Qodobka 32aad
## Baabi'in

Dhaqangalka sharcigaan wuxuu baabi'inayaa dhammaan Sharciyada xariirka la leh daawada iyo agabka caafimaadka sida: Sharci lambar 9, ee soo baxay 26 Janaayo. 1989, kuna saabsan soo dejinta Daawada iyo qalabka Caafimaadka ee aiyo qodobadiisa.

## Qodobka 33aad
## Dhaqangalka Sharcigan

Sharcigan wuxuu dhaqan-gal noqonaya marka uu ansixiyo labada gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuriyadda Federaalka Soomaliya, isla markaana lagu soo-saaro Faafinta Rasmiga ah ee JFS.